



## Ventricular Septal Defect (VSD)

Duleelka darbiga wadnaha ama



Ogeysiis:



The Children's Heart Clinic 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404  
612-813-8800 \* Toll Free: 1-800-938-0301 \* Fax: 612-813-8825  
Children's Hospital of Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404

---

## Duleelka Darbiga Wadnaha ama VSD

### Ventricular Septal Defect

Ventricular septal defect (duleelka darbiga wadnaha ama VSD) waa duleel u dhexeeya labada qeybood ee hoose ee wadnaha (qalbacyada). VSDs waa noocyada ugu badan ee xanuunka wadnaha ee lagu dhasho (20% cilladaha wadnaha). VSDs waxaa sidoo kale la arki karaa iyagoo la socda cilladaha kale ee wadnaha. Waxaa jira dhowr nooc oo ah VSD, oo loo kala saaro meesha ay uga yaallaan qalbaca.

#### Noocyada:

- Agagaarka xuubka: Waxa uu ku yaallaa daboolka halbowlaha hoostiisa. Kuwaas ayaa ah nooca ugu badan ee VSD (70%).
- Dhiigbixidda (dhuunta uu dhiiggu ka baxo): Waxay ku taallaa gudaha darbiga (dhuunta) dhiigbixidda. Qeyb ka mid ah xuubyare VSD wareegsan wuxuu ka kooban yahay sambabka iyo halbowlaha. Dhiigbixidda VSD qiyaastii waa 5 ilaa 7% ah VSDs.
- Dhiiggelista (dhuunta AV): Waa dhinaca dambe iyo meel ka hooseysa agagaarka xuubka ciladeysan, oo ka hooseysa daboolka muruqa liifadaha ah ee darbiga kala-qeybinta. Dhiiggelista VSD qiyaastii waa 5 ilaa 8% ah VSDs.
- Muruqa (Gudhiisa): VSD muruqa dhexdiis waxay ku yaallaan dhinaca dambe ee darbiga. Cilladaha muruqa ee figta sare waxay ku taallaan meel u dhow cirifka wadnaha. Bukaanka qaarkood waxaa laga helaa VSD nooca muruqa. Noocan qiyaas ahaantii waa 5-20% ka mid ah VSDs.

#### Wiisiteynta/Calaamadaha Jirka:

- Carruurta laga helo VSD yar calaamado ma yeeshaan. Guuxa dhiigga ee daadanaya ayaa si fiican looga maqlaa agagaarka hoose ee bidixda xabadka. Dhiigga kore oo caadi ah ayaa la dareemi karaa. Xoogga guuxa kama tarjumayso xajmiga ama heerka calaamadaha.
- VSD weyn waxaa lala xiriiriyaa korriinka iyo koboca maskaxeed oo dib u dhaca, calaamadaha infakshanka sambabka, dulqaad la'aanta jimicsiga, iyo cunto xumo. Calaamadaha wadnaha dhiigga soo saari waaya wadnaha ayaa caadi ahaan ku sameysma da'da 6 ilaa 8 toddobaad gudahood ilmaha laga helo VSD weyn. Sambabka oo dhiigkar yeesha ayaa dhici karta.
- Carruurta waaweyn ee laga helo VSD weyn midabka ayaa doorsoomi kara (midab buluug ah) iyo dhibco muuqda oo ka yimaada xannibaad ku dhacda sambabada (xanuunka Eisenmenger's).

#### Cilladsheegid:

- Raajo Xabadka: Heerar kala duwan oo ah wadneweynaad (wadne-barar) ayey sababi karaan calaamadaha kordhay ee xididdada sambabka qiyaastii bidix ilaa midig dhiigmareen.
- EKG: Caddeynta qalbaca bidix kore iyo/ama qalbaca bidixda oo balaarta.
- Uultarasawanka wadnaha: Cilladsheegid.

#### Maareynta/Daaweynta Caafimaadka:

- 30 ilaa 40% oo ah muruq iyo xuub ahaan VSD waxay ku xirmaan 6da bilood ee ugu horreeya ama waxay sii yaraataa marka ilmuhu weynaado. Dhiiggelidda iyo dhiigbixidda ee VSD si kedis ah uma xirmaan ama waxay sii yaraataa marka ilmuhu weynaado.
- Daawooyinka sida kuwa biyaha saara (Lasix) iyo daawooyinka ACE ee dhiigkarka (enalapril, captopril), iyo/ama caanaha naaska iyo kuwa nafaqeysan oo ah kuwa cayilka ayaa la isticmaali karaa si uu si lama filaan ah duleelku u xirmo ama si loo daahiyo qaliinka.
- VSDs waxaa lagu xiri karaa qalliin ahaan (eeg hagaajinta VSD). Qaar ka mid ah muruqa VSD waxaa lagu xiri karaa qalab ah tuubagelin.
- La-socosho ah wadnaha ayaa ilmaha lagula talinayaa inta uu soo koraayo.
- Looma diidayo dhaqdhaqaaqa ama daawooyin mustaqbalka-fog ah ayaa lagu talinayaa si uu si kedis ah ugu xirma ama si loo sameeyo qalliinka VSD markuusan jirin dhib kale oo ah wadnaha.

#### Natijjooyinka Mustaqbalka-Fog:

- Nolol caadi ah ayaa la filayaa
- Antibiyootiga bakteeriyada waxaa la joojiyaa 6 bilood ka dib markuu duleelku xirmo/qalliin lagu sameeyo haddii aysan jirin dhaawac/dhiigmareen ku yaalla wadnaha.